



ismaamulka san diego



**waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybtada si**

**loo ilaaliyo
marinadeena biyaha**



20DISEEMBAR2016



Gelinadda biyo mareenadda

Maamulka ugu fiican ee Nidaamka Dhismaha Biyaha Daadka (BMPs) ayaa lagu rakibaa dhismeyaasha qaar oo ku yaala Ismaamulka si ay gacan uga gaystaan **kahortaga maadooyinka wasaqda ah sida qashinka, daawooyinka bacriminta beeraha, sunta cayayaanka, iyo qaruuraxa soo gala marinnada biyaha daadka roobka kadibna galaaya baliyadda, wabiyada, iyo badwaynta deegaankeena. Gurigaaga waa mid kamid ah boqolaalka ku yaala Ismaamulkeena oo leh ugu yaraan hal BMP.**

BMP-yadu Waxay Nadiifiyaan Marinnada Biyaheena

BMP-gaaga ayaa loo sameeyay inuu qabto qashinka kahor intuusan gelin nidaamka daadka qaada. Maadaama aad tahay mulkiilaha mid kamid ah dhismeyaashaan, xeerarka ismaamulka ayaa kaa doonaaya inaad **sameeyso kormeer joogto ah iyo talaabooyinka dayactirka** si loo hubiyo in BMP-yadaada si sax ah u shaqaynayaan.



Diiwaanadeena ayaa muujinaaya inaad haysato ugu yaraan hal gufada miyaha daadka ee dhismahaaga. Si ay kaaga caawiso joogtaynta BMP-gaan **Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha ee ismaamulka San Diego** ayaa ku siinaaya buugaan xogta si looga jawaabo su'aalaha aad ka qabi karto BMP-yada iyo sida aad u joogtaynayo.

Sida BMP-gaaga Gufada Daadku u Shaqeeyo

BMP-yada Gufada daadka ayaa difaaca marinnada biyaha ee deegaankeena ayagoo qabta qashinka iyo wasaqda kahor intaysan gelin nidaamka daadka biyaha. Marka biyuhu marayaan duleelka, lakkba wayn ee qashinka ayaa la qabtaa kadibna la kaydiyaa ilaa laga saaro inta lagu jiro shaqooyinka dayactirka. BMP-yada gufada daadka ayaa badanaa laga helaa gudaha marinnada biyaha galaaya nidaamka daadka roobka.

xog dheeraad ah > > >

Gelinta biyo mareenada

Hel oo Hayso BMP-gaaga



Si aad u hesho BMP-gaaga biyo mareenka, ka fiiri gudaha marinnada daadka ee xaruntaada. Waxay badanaa qabtaan cadad badan oo qashin iyo xash ah.

Marka aad hesho BMP-gaaga gufada duleellada, waa muhiim inaad joogtayso. Ku haynta BMP-ga gufada duleelka xaalad shaqaynaysa ayaa kaa caawinaysa inaan ilaalino nadaafada marinada biyaha ee deegaankeena. Hoos waxaad ka helaysaa dhawr shaqooyinka dayactirka ah si aad u samayso:

- **Ka saar qashinka ama wasaq kasta oo ku aruurtay.**
- **Ka codso qof tababar u qaba inuu badelo qaybo kasta kamid ah BMP-ga oo halaabay, ayna ku jiraan dhar kasta oo lagu miiro qashinka.**
- **Haddii gufadaadu adeegsato agabka milma, la xariir qandaraasle u tababaran shaqada si uu u badelo (marka loo baahdo).**

Si aad u hesho liiska shaqooyinka kale, ka fiiri foomka xaqijinta dayactirka ama qorsheyaasha dayactirka ee ka yimaada ee shirkada dhistay gurigaaga.

Sanad kasta Barnaamijka Difaacaha Waraha Biyaha ayaa kuusoo diraaya foomka xaqijinta dayactirka si aad u buuxiso, u saxiixdo, aadna ugu celiso Ismaamulka. Foomkaan waxaa loo adeegsadaa in la xaqijiyo in dayactirka muhiimka ah lagu sameeyay BMP-gaaga.

Ku fashilmida samaynta dayactirka BMP-yadaada ayaa dhalin karta fulinta baaritaan ama kormeerka dabagalka ah.



**waad ku mahadsan
tahay samaynta
qaybaada si**
**loo ilaaliyo
marinadeena biyaha**



20DISEEMBAR2016

**Haddii aad qabto su'aalo, Nagalasoo Xariir:
Barnaamijka Ilaalinta Waraha Biyaha**

1-858-495-5323

BMP.Program@sdcounty.ca.gov

www.sandiegocounty.gov/stormwater